



(Astaanta Shaabadda  
Gobolka ee Minnesota)

# HELIDDA DIIWAANADA CAAFIMAADKA OGEYSIISKA XUQUUQDA

(ACCESS TO HEALTH RECORDS-NOTICE OF RIGHTS-Somali)

Digniintaan waxay sharaxaysaa xuquuqda aad u leedahay in aad heshid diiwaankaada caafimaad, iyo marka macluumaadka qaarkood ee ku jira diiwaankaada caafimaad la sii deyn karo oggolaashahaada la'aantiis. Digniintaan ma baddaleysa badbaadin kasta aad leedahay ee hoos timaadda sharciga.

## **XAQA AAD U LEEDAHAY IN AAD HESHO IYO BAADBAADISO DIIWAANKAADA CAAFIMAAD**

Waxaad leedahay xuquuqda soo socda ee la xariira diiwaankaada caafimaad ee hoos yimaada sharciga:

- Bixiyaha xanaanada caafimaadka, ama qofka diiwaanada caafimaadka ka hela bixiyaha, waa in uu haystaa oggolaashahaada oo saxiixan oo taariiqna leh si loo sii daayo diiwaankaada caafimaad, marka laga reebo asbaabta ku qeexan sharciga.
- Waxaad eegi kartaa diiwaankaada caafimad si aad u hesho macluumaadka ku saabsan baarista, daaweynta, iyo saadaalinta.
- Waxaad, si qoraal ah, ku weydiisan kartaa koobiga ama warbixinta kooban ee diiwaankaada caafimaad, kaasoo waajib ah in si deg-deg ah lagu siiyo.
- Waa in lagu siiyaa koobi ama warbixin kooban ee ku saabsan diiwaankaada caafimaad haddii aanay ka dareynin caafimaadkaada jirka iyo maskaxda, ama keeneynin in aad dhaawacdo qof kale.
- Laguuguma soo dallici karo haddii aad codsatid koobiga diiwaankaada caafimaad si dib loogu noqodo xanaanada hadda kuu socoto.
- Haddii aad codsatid koobiga diiwaankaada caafimaad oo aysan ku jurin xanaanada kuu socota, waxa keliya ee laguugu soo dallici karo waa xisaabta ugu badan ee u dagan sharciga Minnesota ee ku saabsan koobiyeenta diiwaankaada.

## **SII DAYNTA DIIWAANKAADA CAAFIMAADKA OGGOLAASHA LA'AANTAADA**

Waxaa jira waqtiyo khaas ah ee sharciga oggolaashahaada in macluumaadka diiwaanka caafimaadka qaarkood ee u haayo bixiyahaada la sii daayo oggolaashahaada oo qoran la'aantiisa. Qaar ka mid ah asbaabta hoos yimaada sharciga federaaliga, aan laakin ahayn dhammaan, ee lagu sii daayo waa:

- Hawlo cayiman ee caafimaadka dadweynaha gaarka ah
- Marka macluumaadka ku saabsan dhibanayaasha xadgudubka, dayaca, ama dagaalka guriga ay waajib tahay in loo sii daayo madaxda dawladda
- Hawlaha kormeerida caafimaadka
- Tilaabooyinka maamulka iyo habab maxkamaded
- Ujeedooyinka qaas u ah hirgelinta sharciga
- Ujeedooyinka ku deeqida xubnaha qaarkood
- Marka loo baahan yahay macluumaadka caafimaadka dadka geeriyooday si shakhsiyad khaas ah u sii wadaan waajibaadkooda hoos yimaada sharciga
- Ujeedooyinka baaritaanka ee u oggolaaday guddiga asturnaanta.
- Si loo joojiyo hanjabaad halis ku ah caafimaadka iyo ama ammaanka
- Hawlaha dawladda khaaska ah ee la xariira nabad geliyada qaranka
- Ujeedooyinka mag dhawga shaqaalaha

Sida uu qabo sharciga Minnesota, macluumaadka diiwaanka caafimaadka waa la sii dayn kara oggolaashahaada la'aantiisa marka lagu jiro xaalad degdeg caafimaad, ama marka u dalbado ammar maxkamadeed ama ammarka qasbaayo imaashada maragga. Kuwa soo socda waxaa ka mid ah wakaaladaha, shakhsiyaadka, ama ururada noqon kara ama waajib ay tahay in loo sii daayo macluumaadka diiwaanka caafimaadka khaaska ah ama kaddib marka la buuxiyo sharuudo khaas ah:

- Waaxyada Caafimaadka, Adeegyada Aadanaha, Ammaanka Dadweynaha, Ganacsiga, Agaasinka iyo Misaaniyadda Minnesota, Shaqaalaha iyo Warshadaha, Asluubta, iyo Tacliinta
- Ceymisyada iyo loo-shaqeeyayaasha marka lagu jiro kiisaska magdhawga shaqaalaha
- Xafiiska Ashtakada ee Caafimaadka Dhimirka iyo Naafannimada Koritaanka
- Guddiyada/wakaaladaha shati-bixinta xirfadaha caafimaadka
- Dhibanyaasha loo geesto hanjabaadyada halista ah ee gacan ka hadalka
- Sarkaalka Dab-Damiska Gobolka
- Wakaaladaha daryeelka deegaanka
- Baarayaasha caafimaadka ama baarayaasha asbaabta dhimashada aan caadiga ahayn
- Dugsiyada, xarumada xanaanada ubadka, iyo Wakaaladaha Hawsha Jaaliyadda si loo gudbiyo diiwaanada tallaalka
- Baarayaasha cilmiga ama caafimaadka
- Waalidka/Ilaaliyaha sharciga ah ee aan oggolayn daaweynta ilmaha, marka sii dayn la'aanta macluumaadka caafimaadka ay keeni karto dhibaatooyin caafimaad oo halis ah
- Hayadaha hirgelinta sharciga
- Shirkadaha ceymiska iyo kuwa kharashka u bixiya baarista caafimaadka madax banaan

Haddii aad u baahatid macluumaad dheeraada , ama xariirka sharciyada khaaska ah, soo booqo [www.health.state.mn.us](http://www.health.state.mn.us) oo raadi “helidda diiwaanada caafimaadka” ama wac Waaxda Caafimaadka Minnesota oo laga helo tel. (651) 201-5178.

*Sharciyada Minnesota, Qeybta 144.292,  
Qeybta hoose 4ad  
(Minnesota Statutes, section 144.292,  
subdivision 4)*

*Oagaysiiskan waxaa laga  
samaysan karaa koobi.*

Waxaa la baddalay 4/14/09



(Astaanta Waaxda  
Caafimaadka ee  
Minnesota)